# Habka kalgalka

## Borotoono

Walax ka kooban atamo isku nooc ah oo kaliya ayaa lagu magacaabaa curriye. Inta borotoon ee bu,da curiyaha ku jirta ayaa go,aamisa nooca uu curiyaha uu yahay. Curuyayaasha oo idil waxa ay leeyihiin calaamad loo qoro. Calaamadda curiye waa mid ama laba xaraf, caalamka oo dhan si isku mid ah ayaa loo qoraa. Oksijiin(O), haydrojiin(H), dahabka(Au), qalinka(Ag) ayaa ka mida curiyayaasha.

## Habka kalgalka

Curiyayaasha habka loo nidaamiyey waxa la yiraa

habka  kalgalka.

Curiyayaasha ku jira habka kalgalka waxa loo tireeyey inta borotoon ee ay bu,da ku leeyihiin.

Haydarojiin oo ah curiyaha koowaad waxa uu bu,da ku leeyahay hal borotoon. Oksijiin oo ah curiyaha sideedaad waxa ay bu,da ku leedahay 8 borotoon. Safafka jiifaa waxa la yiraahdaa kallal. Marka laga soo bilaabo bidixda kal kasta waxa ay kordhaysaa hal tiro oo ah borotoonada bu,da ku jira iyo hal elektaroonada ku jira wareega ugu danbeeya ee curiyaha. Safafka joogga ah waxa la yiraahdaa ururo. Curiyayaasha isku ururka ahi waxa ay wareega ugu danbeeya ku leeyihiin tiro elektaroono ah oo is le,eg.



**Biraha**

Xagga bidix ee habka kalgalka waxa ku yaal biraha. Biraha oo dhan waa adke marka heerkulku caadiga yahay aan ka ahayn meerkori (Hg). Meerkori marka uu heerkulku caadiga yahay waa dareere. Xagga midigta ee tusaha kalgalka waxa ku yaalla bir-ma,ahayaasha. Qaarbadan oo bir-ma,ahayaasha kamidi hi waa neefo sida oksijiinta iyo hiiliyamta. Curiyayaasha la dariska ah biraha ama bir ma,ahayaashu waxa ay u dhaqmi karaan sida kuwa biraha ah ama kuwa aan biraha ahayn. Curiyayaashan waxa la yiraa biro u ekeyaal(bar-bireed).

**Neefaha wahsada**

Curiyayaasha ku jira ururka 18 waxa la yiraa neefaha wahsada. neefahani waa kuwo deggen. Taa micnaheedu waa lama falgalaan curuyayaal kale, iyo iyaga dhexdooda toona. Sababtu waxa weeye neefaha wahsada oo dhan waa uu buuxaa wareegooda ugu danbeeya ee elektroonaddu. Sidaa darteed uma baahna in ay curiye kale la falgalaan si ay u buuxiyaan wareegooda sare ee elektroonada.

**Biraha alkali**

Curiyayaasha ururka koowaad (1) aan ka ahayn haydrojiin waxa layiraa biraha Alkali. Curiyayaashani waxa ay la falgalaan curiyayaasha kale. Sababtuna waxa weeye biraha alkali hal elektroon oo keli ah ayey ku haystaan wareeg ugu sareeya. Sidaa darteed waxa ay la fal galaan curuyayaasha kale ee u baahan in ay buuxiyaan wareegooda sare ee elektaroonada.